

**Ku Guddomiyaha Golaha Shacabka  
= Muqdishow =**

Ujeedo: **Mooshin ka dhanka ah Ciidamada Kenya ee Jubbada Hoose**

**Muqdishow, 21/05/2013**

**Mudane Guddoomiye,**

Sida ku cad Qod.69aad faqraddiisa 1aad( b) ee Dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo Qod.43aad ee Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka, oo labaduba tilmaamaya awoodda Xildhibaanada in iyagoo xilkooda gudanaya ay hindise sharciyeed kusoo jeedin karaan hab "Motion". Annagoo ah Xildhibaanada hoos ku qoran, waxaan Guddoonka Golaha Shacabka usoo gudbinaynaa Mooshinkan ka dhanka ah Ciidamada Kenya ee ka hawl gala Gobolka Jubbada Hoose, sababaha hoos ku qoran awgood:

- 1) Ciidanka Kenya oo markiisii horeba si sharci darro ah kusoo galay Somalia Sannadkii 2011kii,
- 2) Ka mid noqoshada Ciidanka Kenya ee AMISOM oo goor dambe timid ma noqon mid la mid ah Ciidamada dalalka kale ee AMISOM, waxayna weli ku shaqeyaan awaamiirta dawladda Kenya, taasoo muujinaysa iney meesha u joogaan dano dawladda Kenya ka leedahay Gobolka
- 3) Kenya waxay ku tumatay shuruucda caalamiga ah (international law), Qaraarrada Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay ee tirsigoodu yahay: S/RES/2012 & S/RES/2093 - oo tilmaamaya in AMISOM ay xilkeeda u gudanayso ayadoo dhowraysa madaxbannaanida siyaasadeed Somalia
- 4) Qaraarkii kasoo baxay IGAD Shir Madexeedkiisii 21aad ee aan Caadida ahayn (21<sup>st</sup> Extra-ordinary Summit) oo caddeynaya in Dawladda Federaalka Somalia looga dambeeyo arrimaha maamul sameynta iyo siyaasadda dalkeeda.
- 5) Nabadgelyo darro iyo dagaallo sokeeye oo ka soo muuqda Gobolka Jubbada Hoose, iyadoo dib loogu noqday qaabkii Qab-Qablaysa dagaalka ee laga soo tegay
- 6) Khilaafka halkaas ka taagan oo keeni kara in Gobolku mar kale gacanta u galo Al-Shabaab










Haddaba, waxaan ka codsanaynaa Guddoonka in arrintan dooddeeda Golaha la horkeeno, annagoo quuddareynayna in Xukuumaddu faah-faahin ka bixiso hawsha ay Ciidamada Kenya ka hayaan Gobolka Jubbada Hoose iney waafaqsan tahay Shuruucda iyo Heshiisyada

<b>BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA</b>
<b>XAFIISKA GUDDOMIYAHA</b>
<b>GELID / RECEIVED</b>
TAAR: 25/5/2013
TIX: <i>[Signature]</i>
SOO: <i>[Signature]</i>

Caalamiga, Urur Goboleedka IGAD iyo Masladda Qaranka iyo  
Midnimada Somalia.

Waxaan soo jeedinaynaa Ciidamada Kenya laga wareejiyo Gobolka  
Jubbada Hoose, haddii ay weli kasii mid ahaanayaan AMISOM; haddii  
kalese loogu baaqo iney dalka Somalia isaga baxaan.

Xubnaha Saxiixay Motion-ka.

- Xildh.
- (1) Abdullahi Jama Hussein 
  - (2) Asdi Mohamed Abdirou 
  - (3) DMAR Mohud Mohamed 
  - (4) Shariye Muminis Ajaal 
  - (5) Xil. Maxamed Amin Xasan Elashi 
  - (6) Xil. Sūs Cali Macallin C/gaasir 
  - (7) Xil. Ibrahim Salah Dayzallal 
  - (8) Xil. Maxamed Cumar Maxamuud 
  - (9) " Cabdullahi Xusein Hussen 
  - (10) Mohamed Kerow Mohamed 